DHAGARTA GAALADA IYO DHOOHANAANTEENNA

Qore: Warsame Naalleeye

cirsankayeer@hotmail.com

HORDHAC

Qormadaydan waxaan ku bilaabayaa magaca allaha naxariista badan ee uunkiisa naxariista, nabadgelyo iyo naxariis nebigeenna Allaha siiyo.

Dhibka maanta soomaliya ka taagan iyo balaayada aloosan ee ummaddeenii dhankasta ka saamaysay, waa arrin u baahan in si qoto dheer looga baaraandego, loona baaro halka ay salka ku hayso, isla markaana bannaanka la soo dhigo, lana ogaado cidda dahsoon ee badanaaba waxa dhacaya daaha gadaashiisa ka maamulaysa,dabeedna daawo loo raadiyo mushkiladda jirta.Sidaa darteed ayaan maqaalkan u diyaarshay,uguna magacaabay :[Dhagarta gaalada iyo dhoohanaanteenna], maxaa yeelay waxa socda waa shirqool iyo dhagar, cidda waddana ay isqarinayso, iyadoo dadka balaayada loo maleegayana aanay dareensanayn oo ka dhoohanyihiin,sida maqaalka ku cadna waxaan si gaar ah ugu dheeraaday falanqaynta arrinta yahuudda, sababtoo ah iyaga oo leh doorka ugu wayn ee waxyeellaynta ummadda somaliyeed, se qaab aan la dareemi Karin ku shaqaysta. Maqaalkanna waxaan ku soo bandhigayaa;

1)Baaxadda uu leeyahay dhibka Somali qabsaday.

2)waxa dhibka sababay iyo cidda ka dambaysa.

3)Sababta somaliya loo burburiyay.

4)Qorshihii qarankii somaliya lagu baabi'iyay.

5)Garwaynytii somaliya lagu burburiyay.

6) kaalintii yahuuddu ku lahayd dhibka Somali loo gaystay.

7)Kaalintii shirkadaha shidaalka ee reer galbeedka.

8)Boobka iyo bililiqaysigii ummadda iyo gebagebadii maqaalka.

Mar hadii gaalada isbahaysatay ay somaliya sidaa arxan darrada leh u galeen,cilmaaniyiintii ay soo barbaarsdeenna ay ummadda cadowgeedii u loogeen,cidda sida dhabta ah loogaga fadhiyo wax ka qabashada mushkiladda waa culimada somaliyeed. Qaabka ay wax uga qaban karaanna waxaan ku falanqeeyay maqaalka kan xiga ee aan ku magacaabay:[Mas'uuliyadda culimada iyo mustaqbalka

ummadda] Allena waxaan ka rajaynayaa in uu sida xaqa ah na waafajiyo, dadkeennana ku baraarujiyo dhibka lagu hayo,haadaanta lala maaggan yahay in laga tuuro iyo sidii looga badbaadi lahaa.

BAAXADDA DHIBKA UMMADDA QABSADAY

Inta aynnaan u banbixin kashifidda cidda aafooyinka soomaliya ka dhacay ka danbaysa . Bal horta horeba aynnu dib u milicsanno inta ay le'egtahay iyo baaxadda ay leedahay masaa'ibta ummaddeenna lala beegsaday.

Waa marag madoonto taliskii milletari ee soomaliya qaran jabkii ka hor hoggaanka u hayay in uu gaystay godobo iyo eedo taariikhda baal madow u galisay, godobahaas oo uu ka galay ummaddii uu talada u hayey,tan ugu weynina ay ahayd sidii uu diinta ula diriray, culimadi ina uga dhigay wax la laayo ,kuwa xabsiyada lagu ciqaabo,qayb uu adeegsaday, qaar qurbo naf ka dayay iyo in inta afka la qabtay la yidhi ma hadli kartaan, islamarkaana shacabkii kala dagaallamay diintiisii si ay uga fogaadaan oo aysan ugu dhaqmin. Intaa waxaa dheeraa, gummaadkii shacabka loo gaystay meelkastssa dalka ha ka joogeene.Dulmiyadaas oo ay mirohoodu noqdeen balaayada manta taagan. Hase yeeshee, wixii dhib iyo kadeed la soo maray ,waxaa Iqarso yiri oo wax ka majiraan ka dhigay masiibooyinkii dhacay qaranjabkii kaddib.

Masiibooyinkaas oo tuba ta kale ka laxawbadantahay. Dagaallo aan dhammaad lahayn ,colaado aan madax iyo minjo toona lahayn, oo meel ay ujeedaan iyo meel ay ka jeedaan toona aan la garanayn ,kullina huwan magac qabiileed.

Colaadahaas geyiga oo idil wada gubay.Mirihii dacarta ka kharaaraa ee laga dhaxlay waxay ahaayeen kuwo murugooyin badan iyo uur kutaallooyin ku reebay qofwalba oo dareen islaamnimo ah leh.Waxay reebeen arrimaha soo socda;

1) Burbur qarannimo iyo maamulkii dawladnimo oo gebi ahaanba meesha ka baxay, ummaddiina kuwa gudaha ku jira iyo kuwa qurbaha joogaba ay la mid noqdeen agoon baylahday oo gun mudatay,cadowgeediina hilib bisil u noqotay.

2) Jirridii iyo qowleesatadii la soo adeejiyayna waxay baabi'iyeen oo cagta mariyeen gebi ahaanba kaabayaashii dhaqaale ee ummaddu lahayd iyo hay'adihii danaha bulshada ka shaqayn jiray.

3) shacabkii oo la kala dilay, lana kala dhex dhigay dhiillo iyo kala irdhoobid, taas oo horseedday in la is noco oo la kala qoqobmo. Iyadoo qoloba edeg yar lagu ooday, looguna magac daray maamul goboleedyo kuwaas oo qabiil ku salaysan.

4) Qiyaas dhowr malyan ah ayaa bara kacay oo qaxay,iyadoo qaarkood waddooyinka gaajo iyo cudurro ugu lee'deen, qeybo kalena silic iyo darxumo ku dilootay xeryaha qaxootiyad a ee dalalka deriska ah sida Kenya, Itoobya iyo Yeman ,kuwo kalena waxay maciin bideen oo ay naf ka dayeen dacallada kala geddisan ee dunida, sida Yurub,Ameerika,Ustureliya iyo Asiya.

5) waxaa intaa dheer arrinta aayo xumada ku reebi doonta jiilalka dambe, taasoo ah haraaga suntan nukliyeerka ee geyigan lagu aasay .

6)Qorshaha khatarta ku ah aayaha ummadda ee reer galbeedku maaggan yihiin ee haddaan rag islaam ah oo ka hortaga loo helin aan laga soo waaqsan doonin , kaas oo ah in somaliya laga dhigo kilinka lixaad ee Itoobiya.

Haddaba waxaa is weydiin mudan, waxaas oo dhibaato ah iyo kuwa kale oo aannan halkaan ku soo koobi Karin, oo ummaddeenna lala beegsaday waa tuma cidda baas ee ka dambaysa?

Mise waxaan leenahay: waa arrimo iska dhacay, oo bulshooyinka adduunkuba way soo mari jireen?. Waxaa hubaal ah in nolosha aysan ka jirin wax iska dhaca,' wixiise dhaca inkastoo ay qaddar Rabbi ku dhacaan, haddana Allaah subxaanahu wa tacaalaa wuxuu inoo sheegay in nolosha xumaan iyo samaanba wixii dhaca ay sababo leeyihiin.Innaguna waxaa na laga doonayaa in aan sababahaas baarno,oo wixii wanaagsan aan wanaag ku biirinno,wixii xumaan ahna la daweeyo.

SABABTA DHIBKA IYO CIDDA KA DAMBAYSA

Si aynnu u fahamno arrinta gundhigga u ah dhibaatada ummaddeenna haysata, waxaa lagama maarmaan ah in aan garanno in beladan labo dhinac ka soo jeeddo, oo haddii aynnu doonaynno wax ka qabashadeeda waa in mushkilo kasta gaar ahaanteeda loo abbaaro loona dabiibo.Tan hore oo ah mid ummadda lafteeda ka soo jeedda oo iyadu gacanteeda kula timid.Ta labaadna waa mid gacan cadow lagu maleegay oo ay gaalo ka dambayso.

Mushkiladda hore waxaa gundhig u ah dayicidda loo geystay diinta Alle inoo soo dajiyay, iyo gacan bidixaynta lagu sameeyay. Taana waxaa daawo u ah iyadoo culimadu u sarekacdo in ay bulshada diinteeda barto ,kuna tarbiyayso quluubteedana iimaanka lagu cammiro kaddibna lagu hago tubta toosan .

Mushkiladda labaadna ,wuxuu xalkeedu ku soo ururayaa ,in kolka hore daawo dhab ah loo helo dhibaatadaa hore.Sababtoo ah marka bulshadu ay diinteeda si dhab ah u hanato,waxay helaysaa adkaysi ay isaga caabiso shirqoollada iyo mardabooyinka lala maaggan yahay. In ay shirqoollada u nuglaato iska dhaafee, waxay noqonaysaa bulsho baraarugsan oo wax walbo oo dhanka gaalada kaga yimaadona ku dhowraysa fiiro taxaddar ku jiro.

Inkastoo xalku sidaas yahay, haddana taasi nooma diidayso in aan raadinno cidda dahsoon ee qaska iyo degganaansho la' aanta ku haysa Somaliya . ogaanshaha arrintaasuna waxay dhalinaysaa in ciddii dareen islaanimo leh , ama danqasho iimaaneed ku dambayso uu u tafoxeyto ka hortegidda dagaalka aanay gaalo u kala hadhin ee ay ku soo qaaday ummaddeenna,iyadoo lagu talo gelayo in la kashifo tabaha kala duduwan ee loo maldaho nacaybka naloo hayo.

Arrimahaas aynu kor ku soo xusnay waxay ina hordhigayaan su' aalaha ah:

a)Maxay yihiin sababaha Somaliya loo burburiyay ?

b)Muxuuse ahaa qorshihii loo degay baabi'inteeda?

c)Maxayse ahayd garwayntii lagu burburiyay?

Su' aalahaas jawaabohooda waxay inoo ifinayaaan sirta ka dambaysa waxyaalo badan oo tan iyo qaran jabkii ilaa manta socda.Si su'aasha hore aynnu jawaab waafi ah ugu helno, waxaynu ku khasbannahay in aynnu ka jawaabno su' aasha ah:gaalada reer galbeedka ahi sidee bay u arkaan jinsiga somaliga,ah? jawaabtuna waxay tahay sidatan:

Gaalada reer yurub tan iyo goortii ay burburiyeen khilaafadii islaamka ee Cusmaaniyiinta waxay si buuxda gacanta ugu dhigeen dalalkii islaamka ahaa oo idil, ilaa mantana ay gumeystaan, iyagoo. qab iyo islaweyni ay dilootay marka ay cunsurka soomaliga ah jalleecaan waxaa hortooda ka muuqanaya ummad saddex arrimood kulansatay,kuwaas oo ah:

1) Iyadoo diintoodu islaam tahay ,gaaladuna u aragto in islaamku uu yahay derbi adag oo ka hor istaagaya gaadhista ujeeddooyinkooda fog fog, iyagoo weliba ay si kasta ugu suurto geli weyday in geyiga soomalidu degto ay diin kale ku tallaalaan.

2) Iyagoo sinjiga soomaaliga ah u arka mid isla weyn oo qab badan si fududna aan u qaayibaynnin gunnimada lala doonayo , sida dadyowga ku hareeraysanna aan oggolayn in uu midiidin noqdo .

3) Iyadoo ummadda caynkaas ah ay deggan tahay dhul aad u baaxad weyn oo fidsan min Soomali - galbeedda Itoobiya loo jajuubay ilaa dhulkii Jamhuuriyadii Soomaliya, ilaa NFDii Kenya loo hibeeyay iyo Jabuutida la faquuqay ilaa jasiiradd Soqadra ee yeman la raacshay . Dhulka baaxaddaas lehna waxaa dhex ceegaaga khayrad nooc kasta leh, ha noqoto dhul-beereed , macdan cayn walba leh, isla markaana haysta xeebta Afrika ugu dheer oo kalluun la ciirciiraysa. Intaa waxaa dheer shidaallada iyo gaaska dabiiciga ah oo shirkadaha shidaalka ee reer galbeedka ahi uu dhareerka uga daadanayo .

Baab-el-Mandab | ballaciisu waa 32 km oo u dhaxaysa Jabuuti iyo Yemen... | Sawirka: Google Earth

Intaba waxaa kasii daran , iyadoo mandiqadoodu ay tahay mandiqad aad istiraatiji u ah, oo waxay kulaalaysaa marin- biyoodka Baabul-mandab ee isku xira badda cas iyo badweynta Hindiya. Arrimahaas ay ummaddani kulansatay waxay reer galbeedka ugula muuqatay in danahooda ay mandiqadan ka leeyihiin aysan ugu fuleynin sida ay doonayaan,aananna loo aqoonsanayn isla waynidooda. Intaa waxaa ka daran iyadoo shacabkani uu oodwadaag la yahay dawlado kirishtaan ah oo midood markeedii horeba ahaan jirtay imaarado yaryar , oo intay reer yurubku mideeyeen, oo hubeeyeen dhankaastana ka dhiseen u bixiyeen Itoobiya iyagoo isla markaana ku garab galay in shucuub badan oo muslimiin ah ay xoog ku qabsato.

Haddaba , iyadoo waxaasi ay jiraan isla markana dareensan in cunsurka soomaliga ahi yahay cududda ugu firfircoon ee islaamka u matalaysa mandiqada geeska Afrika, ayuu go' aankoodu noqday in ummaddan loo diido wadiiqa kasta oo ay awood ku yeelan karto. Xeeladaha ay adeegsadeenna waxaa kamid ahaa ;

1) In Soomalida la kala jarjaro oo inta edegyo yaryar lagu kala qoqobo maamullo gaalo oo kala duduwan la kala siiyo.

2) In cagta la mariyo dhammaan dhaqdhaqaaqyada dareen diineed xambaarsan.

3) In dhidibbada loo aaso dhaqanka iyo aqoonta gaalada ee diin la' aanta ku saleysan, si ay u soo baxaan jiilal aan innaba diintooda aqoon u lahayn, hankooduna dhaafsanayn calool la buuxsho iyo gaalo loo khidmeeyo.

4) In loo sameeyo xisbiyo ay raggaas u taliyaan oo rumaysan waddaniyad iyo qowmiyad somaliyeed oo diin ka qaawan.Iyagoo arrimahaas wax badan ka fuliyay ayaa midoobiddii goballadii waqooyi iyo koonfur ee ay ku sameeyeen Jamhuuriyadii Soomaaliyeed waxay reer yurubka ku beertay cabsi ah in dawladdan cusub ay halis geliso dawladda kirishtaanka ah ee Itoobiya.

Raggii hantay hoggaankii Jamhuuriyadda intoodii ay daacadda ka ahayd mabaadi'dii SYL ee ay ugu muhiimsanayd mideynta soomaali-weyn waxay geed dheer iyo mid gaabanba u fuuleen meel- marinta mabda'aas, taasoo horseeday dagaallo ka dhex dhacay Somaliya iyo Itoobiya, dhiig bandanna ku daatay,dagaalladaasna waxay bannaanka u soo saareen cabsidii reer galbeedku qabeen ee ahayd armay dib u soo noolaadaan colaadihii tan iyo qarniyo soo jiitamayay ee geeska Afrika ka holci jiray kuna salaysnaa diin oo Itoobiya halis gashaa.Ilaa ugu dambayntii uu qarxay dagaalkii 1977kii.

Dagaalkaasina runtii wuxuu saameyn weyn ku yeeshay gebi ahaanba mandiqada geeska Afrika, siiba wuxuu raad aan tirmaynin kaga tegay aayihii ummadda Somaliyeed. Maxaa wacay soomaalida iyo muslimiinta dunidaba iyo dadyawga kirishtaankuba waxaa loo wada arkayay dagaal diineed oo ka dhex aloosan muslimiin iyo kirishtaan. inkasta oo kooxdii muslimiinta hoggaanka u haysay ay ahaayeen cilmaaniyiin aan muslimiinta si dhab ah u matalaynnin. Taasina waxay dhalisay in dalalkii carabta ahaa - in yar mooyee- Bakistaan ilaa Iiraan ay hub iyo dhaqaaleba la garab joogsadeen soomaliya, dhanka kalena ay gaalo oo idil si kasta u barbar istaageen Itoobiya,laakin ,quwadihi kirishtaanku waxay indhaha ka qaadeen dawladdii ay hub, dhaqaale iyo dhismo dhinac walba leh ugu deeqeen,una haysteen in ay tahay quwadaha ugu cududda weyn qaarada madow oo barqo cad cagta la mariyay , adhaxdana la jabshay, jeer Mingiste oo ahaa madax- weynihii Itooobiya ee xilligaas uu qaylodhaan hiilo doon ah kula dhex dhacay walalaaliiisa kirishtaanka ahaa, ayna ku dhabowday saadaashiii Dhoodaan markuu lahaa:- haddii aadan amxaarow------ qarbiga oohin kula yaacin.

Taasina waxaa ka dhashay in la miyir maro xoogaggii kirishtaanka ee markeedii horeba soo dhoodhoobay. Waxaana af-labadiisa daan qaylo la kacay gaalo meel ay joogtaba ,sida Juulyooskii Tanzaaniya, Moygii Kenya,murtadkii Gowan ee Nayjeriya,yahuudigii Kastro ee Kuuba, Kartarkii Ameerika,Butruskii Masar,iyo weliba yurub kuweedii Warso iyo Nato.Waxayna si wada jir ah u qaateen go'aan ah in la badbaadiyo Itobiya iyadoo la dhowrayo ballankii hore loogu qaaday boqorkii xabashida

ee Minilik markii 1891kii uu warqad u qortay koox kirishtaan ah oo Barliin ku shiraysay , isagoo ugu beer laxawsaday in dhulkiisu yahay jasiirad kirishtaan ah oo ay dhan walba kaga hareereysan yihiin bad-weyn islaam ah.Si taa loo meel mariyona waxaa amar lagu siiyay Midowgii- sofiyeti ee xilligaas iyo xulafadiisii Warsaw in ay cudud milleteri u adeegsadaan dawladdii Somaliya, ilaa ciidamadii somaliya dib loogu celiyo xad-beenaadkii ay aqoonsanaayeen .

Qaran jabkii kaddib, madax- weynihii hore ee Somliya Maxamed Siyaad isagoo Gedo jooga mar la waydiiyay sababtii uu ciidanka uga soo saaray Somali-galbeed, wuxuu sheegay in safiirkii Sofiyetiga uu xafiiskiisa ugu yimid isagoo xambaarsan digniin culus oo uu ku amrayo in ciidamada Somaliya laga soo saaro Somli- galbeed,hal saac kaddibna uu u yimid safiirkii Maraykanka oo isla digniintaas watay. Taas oo ahayd hiillo diineed iyo arrinta keli ah ee xilligii dagaalkii qaboobaa ay quwadihii Warso iyo Nato isku mowqif ka qaateen.Markii ciidankii Somliyeed dib loo ceshayna waxaaa laga shaqeeyay sidii dawladdaa masiixiyadda ah aysan mardambe halis ugaga iman lahayn dhanka Somaliya.Taas oo macneheedu yahay in Jamhuriaddii Somaliya la burburiyo oo laga masaxo khariidada geeska Afrika.

Kolkii qorshihii milletari la fuliyayna waxaa lagu tillaabsaday barnaamijkii xigay oo ahaa in aan somaliya sheekadeeda dambe la maqlin, kaas oo haddii aanu Alle u sahlin rag islaam ah oo fashiliya ay arrintu noqanayso mid la mid ah ciribtirkii loo geystay Cali-bestinkii Ameerika iyo Aborijinkii Austreliya. Qorshahaas oo meel marintiisa lahaa labo weji oo is xiga , waxaa hirgelintiisa shafka u garaacday dawladda Mareykanka iyadoo reer-yurubkuna ay ku garab taagnaayeen.

Qorshihii soomaliya lagu baabi’iyay

Mar haddii colaaddu ahayd mid diin ku salaysan ,loona aragsanaa muslimiin iyo kirishtaan mandiqada ku loollamaya , gaaladu waxay isku garabsadeen in muslimiinta somaliyeed shaqo laga qabto. Waxaase ayaan darro noo ahayd in somalidu aysan helin quwad adag oo u soo hiilisa sidii dhacday qarnigii 15aad oo ay hiil ka heleen dawladdii islaamka ahayd ee Cusmaaniyiinta markii xabashidu ay u soo gurmatay dawladdii Burtaqiiska oo ahayd quwaddii ugu xoogga badnayd masiixiyadda xilligaas. Taasina waxay sababtay in somalidu ay u nuglaato oo lagu fuliyio dhamaan qorshayaalkii loogu talagalay .Kuwaas oo ahaa;

1) In qaran Somaliyeedba laga masoxo khariidada geeska Afrika. Taas oo ifa faaleheedii ugu horreeyay uu soo baxay 1993kii, markii waxa loo yaqaan qaramada midowday ay soo saar tay khariidada dalalka afrika oo aysan ka dhex muuqanin Somaliya.

2) In la tirtiro riyadii ahayd dhisidda Somali-weyn oo markii horeba hindisaheedu Ingriisku lahaa isagoo ujeeddo siyaasadeed ka lahaa .

3) In laga shaqeeyo oo la fududeeyo sidii Jamhuuriyaddii Somaliya lafteeda loo hoos geyn lahaa dawladda masiixiyadda ee la rabo in geeska Afrika laga yagleelo. Si taa loo fuliyana waxaa la qaaday tallaabooyinka soo socda;

a) In la dhiso ururro qabiil ku saleysan oo lagu wiiqo awooddii Jamhuuriyadda,marka ay salka dhulka la heshana isla iyagaas loo adeegsado sidii aysan dawlad dambe u soo noqon lahayn .

b) In shacabka gudaha lagu gubo oo nabad iyo degganaansho loo diido , dhaqaalaha ummaddana afka dhulka loo geliyo, iyadoo la adeegsanayo qorshayaal ay dajiyeen hay' adaha ka shaqeeya masiibooyinka ummadaha sida IMFta iyo waxa loo yaqaan bangiga adduunka oo runtii ah hay' ado yahuudeed.

c) In la abuuro colaado iyo dagaallo-qabiileed oo dadku isku nacaaan kuna kala dhintaan.Hubkii iyo dhaqaalihii lagu gubi lahaana loo soo dhiibo dhuuni raacyo soomali ah.

d) In sinjiga somaliga ah la gala diriro oo laga fogeeyo diintiisa, iyadoo loo marayo saddex wadiiqo oo ah;

1) In si toos ah loo gummaado culimada diinta, Xarakooyinka islaamiga ahna la ciribtiro. Maadaama ay yihiin cidda keli ah ee dareensan belaayada ummadda loo maleegayo, lana socota cidda ka dambeysa,weliba ku dhiirrata ka hortegiddeeda.

2) In shacabka laga baabi'iyo akhlaaqda iyo anshaxa iyadoo la adeegsanayo daroogooyinka iyo aflaamta jinsiga ah.

3) In gebi ahaanba ummadda la sal kiciyo, loona qixiyo yurub, arlo gaalo iyo meelo daran,iyadoo danta laga leeyahay ay tahay in ay dhalan rogmaan,oo inta ay ku dhex- milmaan dadyowga loo geynayo ay si fudud u gaaloobaan.

e) Si marka Somaliya Itoobiya loo gacan geliyo hanashadeedu ugu fududaato , in loo qeybiyo ilaa lix maamul goboleed oo qabiil lagu saleeyay , lana huwiyo magaca federal, iyadoo nidaamka federaalka ah loogu talo galay in lagu mideeyo oo lagu maamulo dadyaw kala qawmiyado ah oo luqo iyo diin toona aan wadaagin, kaas oo aan sinaba ugu cuntamin somalida dhinac kasta ka midaysan.

Qofkii u kuur gala qaababkii ay wax u socdeen tan iyo qaran jabkii wuxuu garan karaa in ay ahaayeen bernaamijyo si habsami ah loo fulinayay. Si ahdaafta la doonayay loo xaqiijiyona David Shin oo asalkiisu yahuudi yahay Maraykankuna u xilsaaray arrimaha Somaliya ,wuxuu1993kii aqalka cad ee dalkiisa u diray hindise nuxurkiisu yahay in reer yurubku marki horeba ay khaldameen markii ay oggolaadeen in ay midoobaan labadii gobol ee waqooyiga iyo koonfurta oo ay sameeyeen jamhuuriyaddii somaliya. Saa darteed maanta somaliya loo qeybiyo lix maamul goboleed oo kala ah;

1)Somali- land:oo ka kooban qaybtii Ingriiku gumaysan jiray oo laga jaray goballada Sool iyo Sanaag-bari.

2)Bunt-land:oo ka kooban gobollada Sool,Sanaag-bari Bari, Nugaal iyo waqooyi- mudug.

3)Mid-land:kana kooban ,koonfur mudug, Galgaduud iyo Hiiraan.

4)Banadir-land: oo kakoobanBanaadir, Shabeellada dhexe iyo qeybo shabeellada hoose ka mid ah .

5)Bay-land: kana kooban Bay,Bakool,iyo qeybo shabeellada hoose ka tirsan.

6)Jubba-land:ka kooban labada Jubbo iyo Gedo.

Markaas kaddibna si federaal ah loo hoos geeyo Itoobiya. Sidaa darteed ,wasiirkii hore ee arrimaha dibedda ee maraykanka W.Christopher isagoo dareensiinaya Itoobiya doorka loogu talagalay in ay gudato,wuxuu 11-10-96kii Adis-ababa ka caddeeyay in(dawladdiisu ay ka go'antahay in Bariga Afrika laga dhiso dawlad weyn) taasoo uu ula jeeday in Jamhuriyadii Somaliya, Jabuuti iyo Ereteriya la hoos geeyo Itoobiya. Iyadoo hawsha Jabuuti iyo Ereteriya la dib dhigay mar haddii ay hoos geyntooda Itobiya ay fududahay. Si arrinta dhibka leh ay tahay sidii Jamhuuriyada Somaliya loo raacin lahaa Itoobiya. Taas bislaynteedana waxaa loo degay qorshe dheer oo ah in ummadda lagu maaweeliyo waqtigana looga lumiyo shirar aan dhammaanayn oo hadba dal loogu qabto, looguna magacdaro(shirar dib u heshiisiineed). Iyadoo shirarkaas saddex Jabuuti iyo Masar lagu kala qabtay mooyee inta kale lagu qabtay Itoobiya iyo Kenya oo ka simman cadaawadda ay soomali u hayaan,isla markaana hey'adaha shirarkaa maal galinaya ay yihiin kuwii Somali adhaxda jabiyay. Kuwa madasha shirarka la isugu keenayana ay yihiin kuwo afkooda iyo gacmahooduba ka gobo'leynayo dhiigii shacabka somaliyeed.waxaase dib u heshiisiin ugu dhowaa kii Carta lagu qabtay,kaas oo ka soo maaxay maanka madaxdii reer Jabuuti ,kaddib markay dareemeen oo ay u muuqatay qorshaha ay wataan quwadaha kirishtaanka iyo hanka Itoobiya ee ah in goor ay noqotaba ay Jabuuti afka u dhigato. Taana waxay reer Jabuuti tustay in aysan haysan maciin aan ahayn in dib loo soo celiyo qarankii Somaliyeed.

Runtii way ku guuleysteen isku daygoodii ,laakiin dawladdii Carta lagu soo dhisay waxaa loo dhigay jillaafo ay la kuftay oo afka dhulka kula gashay. Kii ugu dambeeyay ee Kenya lagu qabtayna wuxuu ahaa midkii lagu gunaanadayay ee lagu soo afjarayay qorshihii Somaliya loogu talo galay.Kaasoo ahaa in lagu dhiso wax dawlad ku sheeg ah oo laga sharciyaysto lagana ansixisto shirqoolkii Somaliya la la maagganaa.Bal ka warran haddii baarlamaan ku sheeggoodu badankood yihiin kuwii Somali hoollaalay,in badan oo kalena haystaan dhalasho dalal gaalo ah oo badankood ay jawaasiis u yihiin? Bal ka warran haddii axdi-qarameedkoodu qodobkiisa labaad si doqon magarato ah u dhigayo in Somaliya ay tahay Kililka lixaad ee Itoobiya.

Oo maxaa dhimman kol haddii iyagii shirqoolka laga ansaxsaday Baydhabo xabsi- guri looga dhigay,dalka intiisii kalena ciidammadii Itoobiya haystaan cidday doonaana siday rabaan u xasuuqaan .Saw gobolladii woqooyi ma maamulo guddoomiyaha ay Itobiya u soo magacaabatay ee magaca safiir lagu qariyay?,saw Barina qunsul u taliya looma cayimin?.

GARWEYNTII SOMALIYA LAGU BURBURIYAY.

Kol haddaynnu soo aragnay aragtida ay gaalada reer yurubku ka haystaan ummadda somaliyeed, aynnuna soo qeexnay waxa ay ugu talo galeen,waxaa marka fudud in aynnu fahamno tabaha gurracan ee loo adeegsaday garweynta somaliya lagu burburshay.taasoo ahayd unkidda ururro qabiileed iyo jabhado ay horboodayeen niman uu maankoodii horeba sakhraamiyay xukun jacayl .Midwalbana inta qol gaar ah lala galay ayaa heeshiis afka baarkiisa ah lala soo saxiixday ,oo inta dhaqaale loo soo dhiibay hubna hagar la aan loo soo siiyay la yiri xukunkii Somaliya gacanta ku soo dhiga.Iyaguna waa wax hoogay oo sheydaan durbaan u tumayo e ,ma baarin ujeeddada laga le eyahay,ismana aysan weydiin ayaan darrada ay dadkooda badayaan marka ay fuliyaan hawlaha loo soo xil saaray.Waxaa uun kaabiga loo soo dhigay kursigii madaxtooyada ,kaasoo ka indhotiray cawaaqib xumada falka ay ku kaceen. Bal u fiirso

ayaandarane ina Yussuf yey ,oo loo tiiriyo badanaa guuldarrooyinkii dagaalkii 77kii.wuxuu mas'uul ka ahaa dagaal gelintii ciidankii X.D.S.ee aagga Baali iyo Sidaamo. khayaamooyinkii uu galay waxaa ugu foolxumaa in uu si qarsoodi ah ula kulmi jirey sirdoonkii Itoobiya,Kuubaanka iyo Ruushka,iyagoo ka raariday in uu inqlaabo taliskii jirey. weliba u dejiyay shaxdii iyo tabihii uu afgembiga ku samayn lahaa.laakiin ayaan xumadiisa hashii baa ka dhicisay.Markuu Kenya u baxsadayna isla raggii shirqoolka la dejiyay ayaa ka daba yimid oo Adis-ababa geystay,iyagoo halkaas ugu soo dhisay jabhaddii SSDF, hiil iyo hoobana kula garabjoogsaday waxkasta oo uu u baahday oo ahaa hub, dhaqale,siyaasad iyo qalab war-baahin.Kaana waxaan waxba ka duwanayn oo ay gaalo soo dirsadeen qabqalayaalkii SNM.ee ururka loogu soo dhisay London..Sidoo kale kuwii USC loogu soo yagleelay Roma,iyo madaxdii SPM.Dhammaan waxay ka sinnaayeen inay cadow qawsaarro u ahhayeen,ururradooduna ahaayeen garweyntii Somali lagu burburiyay. Marka runta loo hadlana si fiican bay ugu shaqeeyeen gaaladii soo dirsatay.Dantii laga lahaana waa laga gaaray.

Madiidani in taliskii jiray uu ummaddii kadeed baday, laakiin garashada fayow,waxay keenaysaa in dhibka jira inta loo sabro si- sida dhacdayba- aan loo mudan dhib ka weyn, maxaa yeeley dawlad xumi dawlad la'aan bay dhaantaa, lagana shaqeeyo sidii wax loo hagaajin lahaa .Ee ma ahayn in cadawgii soo jireenka ahaa ee ummadda la kaalmaysto ,loona soo horkaco burburinta qarankeedii.Mana ahayn in ay shaqayso caqliyadda ah [wallee cadkanaw ama ku cunay ama ku ciideeyay].

Bal u fiirso ,markii taliskii jiray uu ku guuleystay kala daadintii jabhaddii SSDF, ee la soo dhisay kuwii kale ee SNM,SPM iyo USC, waxay madaxdoodii heshiis kula soo galeen madaxweynihii Itoobiya ee xilligaa qodobbo ay kamid yihiin:

1)In la rido taliskii Siyaad Barre madaxda u ahaa,ama ugu yaraan awoodiisa la wiiqo,si uusan mar dambe u taageerin jabhadihii Itoobiya ku kacsanaa .

2)In markay awoodda qabsadaan Itoobiya la siiyo marsooyin ay wax u soo maraan,haddii dekedaha Casab iyo Musawac ee Ereteriya ay gacanteeda ka baxaan .

3)In Soomaliya ay ka harto sheegashada Soomali- galbeed .Heshiiska ay raggaasi soo galeen miyeysan tusaynin in ay daba dhilifyo gaalo ahaayeen. Mingestena dantuu ka lahaa wuu ku gaaray, oo waa kii 1991kii meel fagaara ah isagoo dadka reer Itoobiya ugu khudbeynaya, uguna faanay in guusha ugu weyn ee lagu xusuusan doono ay tahay in cadawgii soo jireenka ahaa ee Itoobiya uu jilbaha dhulka u dhigay. Iyagina waa lagu shaqeystay oo xukunna ma qaban , qabiilkood ahna wax uma tarin , illeen markoodii horeba waxay ahaayeen maangaabyo la gatay oo aan dareemin belada ummaddoda lala maaggan yahay ee la rabo in gacantooda lagu fuliyo, waxayna si dhab ah ugu sifoobeen tilmaamihii shaacirku iyagoo kale ka bixiyay, markuu lahaa:

isagoo la kala baayacday ..... buu boqor is-moodaaye

baguu oran hadduu badhi liqana ..... baarri buu noqone

haddii nacabkii baabi'in lahaa ..... beesada udhiibo

ballan qaadna loo raaciyo ..... iyo biro dhalaalaaya

ujeeddada ma baadhiyo inay ..... boogi daba taalle

farxad iyo bislaysaa gashoo ..... wuuba bararaaye.

Mid kastane isagoo burursan ayuu beeshiisii qaylo dhaan iyo tolbeelayey qabiil keennii waa la dulmiyay ,xaqiisiina waa la duudsiiyey kula soo dhex dhacay. Isagoo dantiisa dhabta ahi tahay fulinta muraadkii gaalada.Beelihii ay ka dhasheenna ma aysan dhuuxin hadallada raggani ku beerlaxawsanayaan, mana aysan dareemin in ay yihiin rag cadow soo dir saday , sheekada qabiil ee ay la ordayaanna ay ka tahay uun awr ku kacsi . ujeedaduse tahay in soomaliya qabiil qabiil madaxa la isugu galiyo, aayatiinkeeduna noqdo in marka hore iyaga la isku jabiyo kuwa soo harana gooni-gooni loo cuno sida saddexdii dibi iyo libaaxa ayna noqdaan sida shaacirku tilmaamay markuu lahaa:

haddii nacab walaalkaa qabtay ..... oo qaylo kaga yeedhsho

qool-weyn haddii lala dhacay .....oo qaarta lagu boobay

qablanki iyo cataawahi iyo haddaad.....qawda sii maqasho

war quud raadso mooyee haddaad.....qaman dhacoon waydo

markii qudh goyso ee dishee .....qawrac ugu jiiddo

qormadii uu taagnaa hadday.....bawd qalaal noqoto

qudhaadu kolkii ay soo hadho .....oo madi ah oo qaawan

qun yar buu awoodaa inuu .....qoorta kaa jaro eh.

In la qorsheeyay in soomaaliya qabiil-qabiil la isugu laayona-sida wax u dhaceen ka sokow- waxaa marag u ah iyadoo aakhirkii sideetannadii caasimaddii Muqdisho lagu qaban jiray doodo iyo aqoon iswaydaarsi ay maal gelinjireen hay'ado gaalo ah, loogana doodi jiray isirka somalida iyo halka ay ka soo jeedaan.Iyadoo loo kala saaray qaar kushitik iyo baantuu ka soo jeeda iyo ku carab ku abtirsada. iyadoo danta laga leeyahay ay ahayd in la muujiyo in somaalidu waxba isugu jirin. iyadoo la iska indha tirayo diintooda si kasta u midaysay ee u walaalaysay, ayna isu yihiin nin iyo seeddigii iyo wiil iyo abtigii.

Sidoo kaleWaxaa in la xuso mudan hadal dhab noqday , kaas oo uu dublamaasi carbeed ka jeediyay jamaacaddii ummadda 1990kii oo ahaa: (gaalada reer galbeedku waxay soomaliya u arkaan dawlad muslim ah ,ayna hareereeyaan labo dawladood oo kirishtaan ah oo ka waa weyn, islamarkaana uu ka adag yahay. Taas oo ay liqi la'yihiin,markaa waxay qaateen go'aan ah in soomaliya la burburiyo. Tabta ugu muhiimsan ee ay adeegsadaanna uu noqdo qabiilka).

Runtiina tebinkii uu sheegay ayey noqotay . xaqiiqadiina waxay ku biya shubatay in biiri - qaateyaalkii la soo adeejistay ay sidaas beelohoodii u kiciyeen,ilaa ay waxkasta cagta mariyaan ,iska dhaaf dawlad loo dhiso e, nin walba qabiilkii uu shalay soo kiciyay ayuu dib isugu laabay oo jilib jilib iyo qoys qoys isugu laayay. Marka dawladoodiina burburiye shacabkoodiina barakiciye,heer dadkii la gaarsiiayay in ay cadowgoodii si kasta ugu jabaan ,gaalana sidey doonaan ka yeelaan. Maantana waxaa marag ma doonto

ah in jabhadihii qabiilka ku saleysnaa ee dalka dacal- ka- dacal colaadaha iyo dagaalada ka huriyay ay ahaayeen kuwo cadow ku shaqaysnayay oo fuliyay ujeedadii gaaladu wadatay oo ahaa isir-suulinta muslimiinta soomaliyeed. Dhibkuna iyaga kuma ekaan ee wuxuu wada saameeyay muslimiinta Bariga Afrika oo idil,maxaayeelay dawladdaas ayay wada dugsanayeen . Waxaanan af -buuxa ku leeyahay gulufyada Itoobiya ay maanta soomaliya ku qabsatay waxay uun dhammaystir u yihiin dagaalladii jabhadihii hore soomaliya ku soo qaadeen. Taasoo macneheedu yahay in ay ahaayeen dagaallo muslimiinta iyo diintooda lagula dirirayay. Laakin la soo adeejiyay dhagar qabeyaal xariga Alle gooyay,se nala wadaaga magac,midab,iyo dhiig ,diintana nala sheegta . haddii xukun jacaylku uu ka indho tiray waxa ay ku kaceen,taasi waxba kama beddelayso dhabta ah in ay midiidin gaalo ahaayeen ,oo ummaddoodii ay gaalo ugu xireen geedkii ay la rabtay,mana dhicin mid iyaga ka mid ah in maamul uu u dhiso tuulo yar oo uu qabsaday. Taa bedddelkeedana waxay shacabkii ku salladeen jirri aan innaba naxariis iyo beer naxa lahayn,hankooduna dhaafsaneyn dhac,kufsi iyo cunista beer walaal.

KAALINTII YAHUUDDA EE BURBURKII SOMALIYA

Waxaa laga yaabaa in cinwaankani dad badan fajac ku noqdo,maxaa wacay soomali bad an yahuuduba aagga ugama dhowa, oo markuu dhagahooda ku soo dhacoba waxaa maskaxdooda ku soo degdegi kuwoodii hore ee qur'aanka Alle lagaga warramay,ama kuwa Falastiin xoogay ee carabtu is-hayaan.arrintuse sidaa way ka fog tahay ee yahuuddu qayb libaax aye y ka qaadatay hirgalinta qorshihii somaliya loo degay ee ahaa in la isir-suuliyo, qarankoodiina laga masoxo khariidada geeska Afrika . waxaa se kaalinteeda qariyay iyadoo ku shaqaysata siyaabo kala jaadjaad ah oo dahsoon,dabcina umaba aha in ay is-muujiso oo shirqoolladeeda si badheedh ah u fuliso.

Midda kale, markaynnu ka hadlaynno hagardaamooyinka iyo dagaallada soomaliya lagula kacay, waxaa habboon in aynu maanka ku haynno in waxa dhibka geystay ay yihiin sadex qolo oo danahoodu si baas isugu dhafan yihiin.kuwaas oo ah: kirishtaanka ,yahuudda iyo shirkadaha shidaalka ee reer galbeedka. inkasta oo cidda goobta dagaalka ka muuqata ay yihiin quwadaha kirishtaanka .oo iyagu laftooda isku taxluujiya in ay is qariyaan, colaadohoodana aan loo arag mid diin ku salaysan. waxaanan halkan kaga hadlaynaa doorkii yahuudu cayaartay . marka aynnu ka hadalnno kooxaha faraha kula jira waxa soomaliya ka dhacaya , waxaa inoo soo ifbaxaya sida arrinta soomalidu u culus tahay oo ay gacmaha ugula jiraan quwado aanba meesha laga filaynnin , taasoo ku tusaysa baqdinta ummaddan laga qabo iyo ahmiyadda ay leedahay mandiqadan ay deggan tahay. Bal isha la raac raac goobaha arrimaha soomaliya lagu falanqeeyo, immisa dawladood oo la is oran lahaa haba yaraatee iyaga iyo soomaali wax xiriir ah oo ka dhexeeya ma jiro, haddana arrimaheeda faraha kula jira, bal eeg dalalka loo bixiyay (kooxda xiriirka caalamiga ah ee soomaaliya) ee gooya go'aannada somaliya laga qaadanayo, dalal kaas maxaa Somali ka khuseeya haddaan ka reebno Maraykanka oo qorsheyaal gaar ah wata. taasina waxay ina tusaysaa sida cirib tirka ummaddan la isugu qaylo dhaansaday, ayna barbar taallo sida aynnan u dareen sanayn qiimaha ay leedahay ummaddan iyo cabsida laga qabo .

SOOYAALKA YAHUUDDA IYO DABEECADAHOODA

Haddaba ,inta aynnan u gelin falanqaynta kaalintiii yahuuda waxaa habboon In aynnu war bixin iska siinno ummaddan, ujeedooyinkeeda iyo sababta ay Somali waxayeellaynta heerkaas gaarsiisan ugula kacday.Yahuuddu waa ummadda ugu badan ee sooyaal keedu qur' aanku ka warramay, taana waxaa ugu wacan iyadoo baal madow oo foolxun ku yeelatay taa- riikhda dadyawgii Alle diintiisa u doortay . waa ummad ay nacalad Alle ku dhacday ,nebiyadoodiina habaareen ,markii dakanooyinkoodii ay bateenana Alle ku ciqaabay in qarannimo laga dhaariyo ,oo iyagoo dullaysan dacallada adduunka lagu kala firdhiyo, meel kasta oo ay joogaanna la dullaysto oo madaxa laga kawiyo. Waa ummad shar ,fidno,dhaqan xumo,iyo wax fasaadin u go'day. Oo xirribo iyo xeelado aan la malayn karin u leh mu'aamarooyinka iyo shirqoollada bulshooyin iska nabad qaba lagu gubo . waa dad cunsiriyiin ah oo islaweyn, aadanaha kalena aan waxba u aqoonsaneyn,qab dartiina aan garanayn dhul iyo cir midka ay joogaan. Tilmaamahaas xunxun ee ay kulansadeen waxay badeen in la necbaysto oo lagu takooro xeryo u gaar ah oo loo aqoon jiray (ghettos), marar badanna dhaqan xumadooda darted dadyowgii ay ku dhex noolaayeen, waxay dantu ku kalliftey in ay ku kacaan oo gummaadaan, taasoo keentay in maalinba dal laga qixiyo.

Haddaba, markii ay noqotay ummad kheyr iyo wanaag loogu caalwaayey, oo belaayo oogid u dhar dhigatay, ayay xikmadda Alle waxay keentey in arrimahooda si faahfaahsan loogaga warramo qur'aanka. Si muslimiinta oo ah ummadda loogu talo galay in ay noqoto Booliska adduunka kala dagaallama fasaadka ay uga foojignaadaan yuhuudda sifooyinka kor ku xusan leh. Waa run oo quraanka ALLe wuxuu inoo sheegay in waagii hore yuhuudda uu ka doortay ummadihii jiray, laakiin markii ay kibreen, abaaldarreeyeen, diintoodii lagu sharfayna baalmareen, ambiyadoodiina ka dhigeen qaar ay diideen iyo kuwa ay laayeen, yaa ilaahay lacnaday oo ilaa qiyaamaha darxumo iyo dulli guudka ka saaray. Hase yeeshee, doqonnimadooda, doorashadii diinta ku salaysnayd ayay u qaateen in ay ahayd mid ku dhisan cunsurka iyo sinjiga ay kasoo jeedaan kaa soo ah in ay yihiin dhashii nebi Yacquub (Israaiil)- Naxariis iyo nabadgelyo Allaha siiyee, taasna waxay gayeysiisay in ay isu arkaan in ay yihiin dhashii Eebbe, loona doortay in ay hoggaanka adduunka iyaga uun leeyihiin oo looga dambeeyo. Waxaa ka sii daran oo ay qabaan in dadyowga kale loo abuuray inay iyaga uun u adeegaan, oo sida dameeraha u rartaan.maadaama aysan heysan diin sax ah oo ay adduunka ku hoggaamiyaanna, waxay ula muuqatey tubta ay talada ku hanankaraan in ay tahay laba dariiqo:

1) In dhaqaalaha adduunka ay gacanta ku dhigaan, wadiiqo kasta oo arrinkaas lagu gaarayana la adeegsado, iyadoo aan dan laga galayn cid kasta oo ku waxyeellowda. Taasina waxay sababtay in colaado badan oo aduunka dacalladiisa ka dhacay ay iyagu huriyeen si ay muraadkaa u gaaraan. Marka wax lala yaabo ma aha haddii la sheego in maal badan oo adduunka yaalla ay iyagu leeyihiin. dowlado badanna ay ku gumaystaan oo sanka uga duran yihiin.

2) In aadanaha Rabbigood laga fogeeyo, oo dhaqan xumo iyo diin la'aan loo horseedo, si ay u noqdaan kuwo ka liita xaya waanka oo aan lahayn karti iyo dadnimo ay isaga celiyaan hadimooyinka yuhuuddu ku

waddo. Hadalkaana runnimadiisa waxaa marag u ah in dadyowga faafiyey ilxaadka iyo fikaradaha xambaarsan baabi'inta akhlaada iyo anshaxa ay yihiin iyaga.

Labadaa arimood oo ilaa heer ay ku guulaysteen waxaa saamaynteeda laga arki karaa sida dadyowga adduunka iyo quwadaha waaweyn uga goojiyaan yuhuudda,raalli galinteeda iyo u adeegiddeeda ugu kala tartamaan.

Inkasta oo ururradooda qarsoodiga ah ay muddo ka shaqaynayeen ka yool gaaridda hadafkooda kor ku xusan, haddana waxay si dhab ah u billaabatay dhammaadkii qarnigii 18aad, markii ay hirgaliyeen waxa taariikhda la khalday looga yaqaan kacaankii Faransiiska, oo ahaa kacdoon gun iyo baarba ay ka dambeeyeen ururkooda qarsoodiga ah ee maasuunyada.Kolkay Faransa gacanta ku dhigeenna waxay billaabeen In yurub oo idil ay colaado iyo qalalaase ka abuuraan si ay talada oo dhan gacanta ugu dhigaan,taasina waxay keentay in maanta madaxda yurub iyo waxa hoos taga badankood ay yuhuud yihiin, isla markaana dhaqaalaha aduunka ay hanteen.

Hababka ugu badan ee hantidaas ay ku heleena waa dagaalladii ay ka dhex oogayeen qoomityadihii reer yurubka .

Haddaba iyaga oo reer yurub ka dhigtay cagaftii ay ku jabinayeen darbi kasta oo adag, waxaa yuhuudda ilaa xad u hirgalay himiladoodii ay ku taami jireen oo ahayd in mar uun dawlad iyagu leeyihiin ay xukunto adduunka, taasoo ah waxa maanta loo yaqaan: (Ururka Quruumaha Midoobay),taas oo ah dowladdii dowladaha adduunka, dalalka kalena ay yihiin gobollo, madaxdooduna guddoomiyayaal. ururkaas oo sal iyo baarba ah urur yuhuudeed. Waxa ugu weyn ee loo dhisayna ay tahay hirgalinta ujeeddooyinkooda, ayna ugu muhiim santahay:

a)Dib usoo noolaynta iyo dhidibba u taagidda boqortooyadii reer Banii israaiil oo ku dherersan inta u dhaxaysa labada webi ee Niil iyo Furaat.

b) In kor iyo hoosba la dhowro baal gorayona loo xiro cunsurka yuhuudiga ah meel kasta oo uu aduunka ka joogo.

c) In la fududeeyo tabaha yuhuuddu ku taabi lahayd dhaqaalaha adduunka.

d) In la baabi'yo wax kasta oo dadka aan iyaga ahayn ku heli karaan awood ,mid maaddi iyo mid macnawiba.

Haddii arrimaha sidaa loo fahmo waxaa mesha ka baxaya la yaabka ah in iyagoo ah dadka adduunka ugu fulaysan uguna liita oo ugu maal jecel, sida ay ummadaha adduunka ay u gumaystaan, isla markaana madaxda adduunku ay saf ugu galaan xarunta madaxtooyadooda ee N.Y.

Akhristuhu yuu is dhihin awoodda aad siisay yuhuuda armay ka badbadis tahay,laakiin ma aha ee waa xaqiiqo ,oo yuhuuddu maanta waxaay joogaan heer aysan weligood ku riyoon in ay gaarayaan,waayo sankaa looga wada mudan yahay,hana moodin marka yuhuud la sheegayo in loo jeedo dhowrka malyan

ee falastiiin haysta ee waa ragga maal qabeennada ah ee yurub iyo Ameerika deggan ee addunka ku amar ku taagleeya. Taana waxaa marag u ah in cidda maanta qaska ugu badan adduunka ka wadda ay yihiin kooxda hadda ka talisa USA ee loo yaqaan qunyar socodka cusub oo uu horboodayo yuhuudiga Dick Cheney oo matalaya ururka yuhuudda caalamiga.Wax lala yaabana ma aha in ay say doonaan wax u gubaan maadaama aanay jirin cid iska celisa, waxaa ayna la mid yihiin budhcad hubeysan oo wax iska dhiciya wayday soo arlada kharribi mayso? waxay doontona samayn mayso?.

Qur'aankaana lagu sheegay in yuhuud ilaahay ku xukumay dulllinimo abadi ah.waxayna ka badbaadi karaan uun haddii ay islaamaan ama ummadaha kale ay diinta Alle ka fogaadaan, taasoo keenaysa in ay madaxa la kacaan, shirqooladooduna fulaan, dad yowga kalena ay dulleystaan.Sidoo kale waxaa suuratul-israa ilaahay ku sheegay in reer banii israaiil horey loogu wargeliyey in addunka ay laba jeer fasaadin doonaan(Aaya 4), culimada qaarkoodna kadib markay arkeen siday adduunka muslim iyo gaalba sanka u haystaan oo ay arlada u fasaadiyaan ayaa waxay tilmaameen in marka labaad ee aayaddu sheegayso ay maanta tahay.

Waxaa haddaba ina hor imaanaya su'aasha ah:-Haddiiba adduunka saa u maamulaan maxay uga baahan yihiin dib usoo noolaynta boqortooyada ay doonayaan? Jawaabtuna waxay tahay: sidaa n soo sheegnay badanaa hantida yurub, Ameerika, iyo dalal kale oo badan taalla iyaga ayaa iska leh siday doonaanba ha ku soo gashee. Kurbada ugu weyn ee ku taaganna waa iyagoo hantida baaxaddaas ah leh, awoodda xukun ee aan soo sheegnayna haysta yay isu arkaan in aysan lahayn qaran , shacab urursan iyo ciidan ilaaliya oo kood ah. Taasoo muujinaysa in ay magan u yihiin ummado iyo dowlado ay wax badan soo ciileen, colaad iyo nacayb ba'anna u qaba, goor ay noqotobana lagu gadoodi doono, hilbohoodana la karsan doono. Arritaasina waxay waxgaradkoodii ku bixisay in intay goori goor tahay lagu dadaalo dhisidda qaran kulmiya yuhuudda dacallada aduunka ku kala firirsan oo lagu qiyaaso ilaa 20 malyan, kadibna hantidooda la isugu geeyo dhulkaas ay dowladdooda ka yaglee layaan, ciidan ay leeyihiinna uu difaaco.Hirgalinta mashruucaasna wuxuu keensanayaa:-

a) In dalalka carbeed ee dariska la noqon doona dowladdaas la burburiyo, awooddoodana la wiiqo, lagana soo reebo imaarado yaryar oo ka kooban kirishtaan,shiico, duruus iy o nusayriyiin. Kuwa sunniga ahna la kala kit kitfo oo Masar, Sucuudiga, iyo Ciraaqba min saddex dal loo qaybiyo, lagana dhigo dowlado yar yar oo tabar iyo taag toona lahayn, iyaaga dhexdoodana la isku xuuxiyo.

b)In cagta la mariyo waxkasta oo caqabad ku noqon doona hirgalinta qorshahaas.Haddaba somaalida qodabkan ayaa qabanaya. oo cuqaasha yahuuddu waxay u arkaan in jiritaanka iyo ganacsiga dawladdoodaas uu hal bawle u yahay marin biyoodka Babul-mandab, ayna halis kaga iman karto soomaalida muslimka ah ee dhankasta ka midaysan sidii la doonayayna u cabiidsami wayday ee mandiqadan istiraatijiga ah deggan . Go'aanka cuqaashoodu wuxuu marka dhaafi waayay in soomaaliya dhagta dhiigga loo daro. sidaas bayna wax yaalihii soomaali qabsaday kaalintooda ugu weyn ugu lahaayeen.Iyagoo adeegsanaya hay'ado kala duduwanna hubeeyay jabhadihii Somaliya lagu wiiqay,basaasiintooda Mosaadkana si kasta dalka u dhex mushaaxa, qaatana qaybta ugu wayn ee ugaarsiga iyo cirbtirka culimada iyo la dagaallanka dhaq dhaqaaqyada islaamiga ah, iyagoo adeegsanaya calooshood u shaqaystayaal Somali ah. sidoo kale iyaga ayaa Itoobiya wax ka soo hubeeyay oo xataa

hubka BMka casriga ah ee muqdisho lagu xasuuqay keenay, kuwa ku dagaallamayana Telaviv ku soo tababaray.

Kaalintii shirkadaha shidaallada

Markii dagaalkii labaad ee dunida uu dhammaaday .Maraykanku wuxuu dalalkii yurub siiyay dhaqaale badan,si ay uga soo kabtaan burrburkii dagaalka ka soo gaaray, kaasoo lagu magacaabijiray (mashruucii Marshal).

Haddaba Talyaaniga oo koonfurta soomaaliya loo fasaxay in uu dib u gumaysto ,ayaa si uu wax uga helo dhaqaalahaas , wuxuu Mareykanka ku sasabtay in shirkadihiisa uu u fasaxayo in ay soomaaliya shidaallo ka baartaan. Kuwaas oo howshooda qandaraas ku siiyay shirkad Maraykan ah oo loo yaqaan Sinclair. taasoo soomaaliya dacalkasta baaritaan kaga sameysay .baaritaanadaasna waxaa lagu ogaaday in soomaaliya ay dhex ceegaagaan shidaallo aan la qiyaasi Karin . intaa wixii ka dambeeyayna shirkadaha Maraykanka iyaga ayaa soomaaliya isa siiyay .

Waana in la ogaado in shirkadaha shidaallada ee reer yurubka ahi ay leeyihiin awood dhaqaale oo ballaaran, kaasoo ay ku hagaan siyaasadaha waddammo badan oo dunidda ka tirsan, dad -yowgoodana dhulalka ay deggan yihiin iska xijisiiya , Markay doonaanna dejiya ,kolkay u bogi waayaanna salkiciya,sida ay dadyow badan ay ku sameeyaan. Marka ha cusleysan in shirkadaha shidaalladu door weyn ku leeyihiin waxa soomaliya ka dhacay ee ilaa hadda kasocda . Kuwa soomaliya salkiciyay ee madaxeedii minjo u rogay waa shirkadihii maamulkii hore ee soomaliya ka helay qandaraasyo shidaal soo saaris ah ,ayna ugu muhiimsanaayeen Conoco iyo Shefron . oo iyagoo ay ujeeddada ka mideysan yihiin kooxihii kirishtada iyo yahuudda ayay si dahsoon ugu hawlgaleen burburinta soomaaliya ,waxayna dhaqaalo badan u hureen jabhadihii soomaali lagu halaagay,shirarkii ummadda lagu maaweelinayeyna maalgaliyay .Markii arrinta soomaliya la bisleeyayna inta Itoobiya soo hubeyeen oo dhaqaalo siiyeen ayay ku garab joogsadeen in ay soomaliya qabsato.

Shirkadahan qorshohoodii ugu dambeeyay waxay billaabeen markii wakiilkii Konoko soomaaliya u fadhiyay uu 1989kii la kulmay madaxweynihii soomaliya , uuna hordhigay qorshe ay Conoco wadatay oo ahaa in gobollada Bari ay ka soo saarto shidaal, muddo labaatan sano ku simmanna wixii la soo saaro ay shirkaddu yeelato, dawladduna aanay saami ku yeelanayn. xataa khabiir dowladda kasocda aanu tagi karin rugaha shidaalka laga qodayo .laakin Maxamed Siyaad inta warqaddii wakiilka ku xooray ayuu yiri :soomaliya Somali baa iskaleh ee Conoco kama amar ku taagleyn karto .Isagiina isla goobtii ayuu ku hanjabay, shirkaddiisiina kaga dhabaysay. Xogaha jirana waxaa ka mid ah in inta badan waxyaalihii qaran jabka ka hor ka dhici jiray Muqdisho ee ahaa qaraxyo iyo khaarijinta saraakiishii ciidamadda iyo abaabuliddii dhallintii(Ciyaal-Faay-Cali) iwm. Ay ka dambeeyeen dad shirkaddaas maal geliso.Waxaanan hilmaamaynin qiso nin saaxiibkay ah ii sheegay oo ahayd: in nin ay isku dheer yihiin ay burburkii ka hor nin jarmal ah isku hay'ad ka shaqayn jireen.

Markii xaaladdii Somaliya meel xun maraysay ayuu waydiiyay bal in uu garanayo cidda waxa socda ka dambaysa,wuxuuna usheegay inuusan garanayn. Markii la qaxay ayay dalka Kenya ku kulmeen, saa isla su'aashii ayuu waydiiyay,wuxuuna ugu jawaabay: ka fekeray Conoco-se dhaafin waayay.Ninkii jarmalka ahaa inta qoslay ayuu yiri:hadda ayaad heshay.Qisadan waxaan marag uga dhiganayaa anigoo og ugu yaraan dhowr iyo afartan hay'adood oo Soomaliya ka hawl geli jiray in shaqooyinkooda ugu badan ay ahaayeen basaasnimo,mid walbana ay ogayd waxa dalka ka socday,cidda wadday iyo iyaga laftooda shaqooyinkooda. sidoo kale, markii 1993kii xarakadii Itixaadku qarka u fuushay in ay gacanta ku dhigto gobollada Bari iyo Nugaal, waa tii Conoco iyo walaaleheed(the seven si sters) ay soo kiciyeen Maraykanka iyo huwantiisii xambaarsanaa magaca waxa loo yaqaan U.Nta, oo isku qarinayay kaalmo bini-aadannimo in ay u socdaan. se ujeeddada dhabta ahi ay ahayd in laga hor tago islaamiyiinta cabsida laga qabay. Allana waxba kuma aha in uu ka hadalsiiyo dad badan oo xogihii Conoco iyo walaaleheedba haya .

BOOBKA IYO BILILIQAYSIGA UMMADDA

Waxaynno ka soo hadallay kooxaha sida jaan isugu dhafan ee Somali silacan baday, qorshihii ay qarannimadooda ku baabi'iyeen, tabihii ay isticmaaleen iyo cidda ay noo adeegsadeen. laakiin, waxa dadka as qaxar iyo hoog la marshay waxaa ka darrnaaday oo barbar socday boobka iyo bililiqaysiga lagula kacay.

waxaana laga yaabaa in dadka qaarkii yiraahdo:maxaay yihiin dadka la bililiqaysanayo, ma xoolaa?!c ciddii dhug lehi ha ogaato in ummaddeennii gaalo ujeeddooyin qarsoon leh ay daabulatay, oo meel daran u dalwisatay, mar haddii qaran iyo qareen u hadlayah aanu jirinn, waxa dadkeenna lagula kacay waa bililiqaysi kii ugu fool xumaa.

iyadoo dalkoodii jaxiimo looga dhigay, dhan kastana dab looga shiday, noloshiina cidhiidhi laga geliyay, ayaa dalalka deriska ah looga furay xeryo qaxar iyo dullinimmo lagu baray, loon diyaarshay ururro dad qalato ah oo masiibooyinka ummadaha ka dullaala oo loo baxshay ururro samaf aleed, kuwaas oo badankood ka shaqeeya sidii dadka debedaha iyo carro gaalo loo gu daldalilahaa, iyadoo lagu qaadayo kafaalo kaniisadeed, danta la watona ay tahay:

a) In la bahdilo oo la karaamo tiro, lagana dhigo qaxooti baryo iyo gacan hoorsi ku nool.

b) In dhulkooda laga faaruqiyo lagana fogeeyo, si loo dhaxal wareejiyo oo loo xaqiijiyo ujeeddooyinka fogfog ee loo dan leeyahay.

c) In iyaga iyo ubadkooda dambeba diinta laga halleeyo oo lagaaleeyo.

Waxaa itaa barbar socda iyadoo dalalka deriska la siiyay baaq hoose oo ah in Somalida la siiyo warqadaha aqoonsiga iyo baasaboorro, loona oggolaado in ay dhulalkooda ka shaqaystaan, si aysan somaliya unoqon. isla markaan dalalka fogfog ee loo qaadayo sida yurub iwm.lagula taliyay in ay u fududeeyaan helidda sharciyada.

waxa loo jeedo ee la rabo in la daldalo ma'aha oo keliya kuwa ku jira xeryaha qaxootiyada, ee waxaa la damacsan yahay in 80% inta gudaha ku hadhay la soo qixiyo,iyadoo tabo baas oo aan la dareemayn la adeegsanayo.ayna ugu weyn tahay in dagaallo sanka isku haya dhan walba lagaga huriyo. Markay xabbadda u caalwaayaanna, inta nin walba ubadkiisa gacanta ku soo dhago yiraahdo: belo ku degtay meel maahee i dhaafi ! qorshaha sal kicinta iyo qaxinta waxaa kale oo loogu talo galay kuwa Somali - galbeed deggan.

Inta badanna dadka la daabulayo waa dad caamo ah oo diintooda aan aqoon u lahayn, ha noqdeen haween, carruur, ama rag waaweyn, kuwaas oo ay fududahay in la dhalan rogo. waxaana nasiib darro ah in dadkaas ableylagu googooyay iyagoo faraxsan oo qoslaya. oo markii dhulkoodii dacar looga dhigay ayaa arlo gaalo iyo meelaha daran ee loo wato loo qurxiyay, oo kii loo qaadayaba u haysto in uu jannadii fardawsa helay.. waxaa yaab ah in dadka yurub iyo waxa soo raaca u qulqulaya aysan ahayn oo keliya dadka degaannadooda lagu holciyay, se waxaa socda kuwii gobolladoodu xasiloonaayeen.

Kaba sii darane, waxaa yaacay tiro badan oo muddo ka shaqeysan jiray dalalka afrika iyo carabaha, si kastana u ladnaa. bal waxaa jira dad tobaneeyo kun oo doollar ku bixiyay si ay me elahaas daran u galaan.

Runtiina waa nolol madaxeedii minjo loo rogay, waa ummad caqligii laga xaday oo maskaxdeedii rumay lagu dhuuqay. maxaa lagu fasiri karaa qof tobaneeyo kun oo dollar yurub ku galay, si uu lacag cayreed ugu noolaado.?!

Dadyawgaa lagu uruurshay xeryaha qaxarka iyo qaxootiga ee loogu talo galay in la raro, si loo jeclaysiiyo meelaha loo wato, waxaa malin walba lagu xiiso geliyaa wax lagu hiyi kacsho, iyagoo lagu leeyahay: maanta ashraaf baa la qaadi. berri boon baa la daldali. saa dambena baantuu baa la uruurin. saakuunna curyaammada ayaa fayl loo furi. bisha dambana garoobyada ayaa la rari.iyadoo dadkii maalinba qolada la magacaabo ku yaacaya oo sheeganaya. heer dadkii la gaarsiiyay in la yidhaahdo: haweenka la kufsaday iyo gabdhaha aan lagudin hadal la'aan baa la dhoofin. oo rag badan ku doodeen in xaasas koodii la kufsday, kuwa kalena gabdhahoodii gaalo hor fadhiisiyeen si loo arko in aanay gudnayn, in kalena ka shallaayeen gudista gabdhahooda.

Bal calool xumadaa fiiri, iyo sida dadkan loo dullaynayo.! oo dadkan wayba iska kaxaysayaane, maxay u sii bah dilayaan?! markay gudaha Kenya geeyaanna kaniisadaha ugu xaraynayaan?! Anigu waxay ila tahay: in loola dan leeyahay in dadkan la qabjebiyo, dareen koodana laga masaxo didmada diineed ee ay ka qabaan kaniisadda iyo gaalnimada.

Bal belaayada taagan, qorshaha la wado waxaa ku jira in la qaado dhallinta da'yarta ah iyadoo lagu shardinayo in aysan shan iyo toban sano gaarin oo aanu waalid la soconnin.Yaa diidi kara in waxaas oo idil ay yihiin shirqool ciribtir iyo isir suulin ummaddan loogu talo galay.?midna aynnu maanka ku haynno, taas oo ah : hay'adaha dadka raraya iyo kuwa qandaraaska ku siiyeyba ma ay laha waddammada ay dadka u qaadayaan, ee waxay uun ka faa'idaysanayaan qawaaniinta dalalkaas u yaalla iyo xeerarka waxa loo yaqaano UNta.

Dadkaasina marka dhulalkaas qaxootinnimmada loo geeyo waxaa lagala hortagaa karahsi , quudhsi, marar bandanna dil iyo iyagoo lagu khasbo in ay ku milmaan dadyawga ay u tageen, ayna si buuxda ugu dhaqmaan qawaaniinta dalalka la geeyay, taas oo natijadeedu tahay in ay nasakhmaan oo si tartiib-tartiib ah diintooda uga baxaan.

waxaana laga wada dheregsan yahay dad badan oo gaalo ah oo maanta yurub iwm. ku nool in awoowyaashood ay muslimiin ahaan jireen. Nin aan ku kalsoonahayna wuxuu ii sheegay in Australia uu ku arkay oday waayeel ah oo reer Afqaan ah, wuxuuna u sheegay in ka joogo boqol kun oo qoys oo horraantii qarnigii hore uu Ingiriisku Australiya keenay, kaddib markii ay qaateen dhaqammadii gaalada oo ay ku dhax milmeen ay gaaloobeen .

Dad badanoo jahligu indho tiray, dareenkooda diineedna aad u daciifay ayaa waxaa uun u muuqda halaalaca nolosha yurub ka jirta,iyo faajo-faajoodka dhalanteedka ah, mana arkaan aayo xumada iyo aakhiro seegga meesha taalla. in kasta oo intii dhug lahayd ee dareentay halista iyaga iyo ubadkooda ku soo fool leh ay soo carareen, haddana ma yara cabaadka iyo qaylo dhaanta soo yeeraysa, ama waxa rag nasakhmay ee laga dayrinayo, ama ubad faraha ka baxay ama haween inta loo sheeko xumeeyay haadaan laga tuuray. Waxaa hubaal ah in ay dadkaas la bililiqaystay aan loo gurman amaba iyagu laftooda la soo baxsan uu aayatiin madow ku soo wajahan yahay

GEBOGEBO

Wixii ka dambeeyay dagaalkii 77kii ilaa manta waxa Somaliya ka socday waxay ahaayeen qorsheyaal si habsami ah loo fulinayay iyadoo la tiigsanayo ahdaaaf fog fog oo biyo- dhacooduna yahay isir-suulin.Iyadoo Maraykanka oo matalaya saddexda qolo ee shirqoolka degtay ee kala ah xoogagga kirishtada,yuhuudda iyo shirkadaha shidaallada ayuu godobaha ugu badan Somali ka galay ,ayna guudka ka saaran tahay dhammaan wixii Somali qabsaday ha noqdeen wixii dhiig la daadshay oo ay dileen jirridii uu caqliga ka xaday ama Itoobiyaanku xasuuqeen ama isagu diyaaradihiisa iyo maraakiibtiisa dagaalku gummaadeen.Hey'adihiisa sirdoonka ah bay ahaayeen kuwa waddanka si kasta ugu dhex jiray ee Somali bool-bool u kala furfuray.

Waa isaga waxa ka shaqaynaya kala jar-jaridda Somaliya, maantana u ololaynaya hadba inta la gooyo in gooni loo aqoonsado,ulana dhaqma sidii waddamo gaar u taagan.Waa isaga waxa la soo taagan in ay caddaalad darro tahay in toddobaatan malyan oo Itoobiyaan ah ay xeeb la 'aan noqdaan ,toddobo malyanna haystaan xeebta Afrika ugu dheer.cidnana kama dahsoona in maanta isagu Itobiya dabada ka riixayo, maalinka ay dhacdo in ay u maaro waydana wuxuu soo hor kicidoonaa ciidammo la huwiyay magaca waxa loo yaqaanno UNta . Waa isaga cidda calooshood u shaqaystayaalka Afrikaanka soo hubeeya Somaliyana ku soo daabulaya,kuwooda la laayana magdhowga ka bixinaya.

Waa in qof kasta oo muslim ah meel ku qorto eedaha nala ka galay,jiilalka dambana loo tabiyo si ay ugu beerto cadaawad ma hadho ah.Maraykankuna ha ogaado in la la socdo oo aanay waxba u taraynin

magacyada beenta ah ee uu isku qariyo sida dawladda ku meel gaarka ah,beesha caalamka,hey'adaha sama falka,ciidamo nabad ilaalineed, iyo Somali sir –la-luud ah oo u jaajuusa loona bixiyay bulshada rayidka ah.

Ninka gebiga nagu soo dunshow-sow kugaran mayno Dadka somaliyeed waa in ay dareemaan in waxa lagu maagayo uu yahay islaamnimada, kartida iyo maskax furnida Alle ugu deeqay iyo mandiqada xasaasiga ah ee ay deggan yihiin.

Marka waa in cadowgu aanu ku guulaysan u jeeddooyinkiisa gurracan ee waa in diinta lagu mintido, lagana hortago ummaddan dhulkeedii la dhaxal wareejinayo iyadiina qaxootinimo la badayo oo la gaalaysiinayo.

Waa in maanka lagu hayo waxa Somali maanta meesha xun ee ay taallo dhigay in ay yihiin raggii ay gaaladu soo tarbiyaysteen ee cilmaaniyiinta ahaa,saa darteed,waa in hoggaaminta halggammada soo socda laga fogeeyo.Sidoo kale cidda keli ah ee inta Somali walaalayso,midayso,tubta toosanna ku hagi karta isla markaana cadowgeeda sutida u qaban karta in ay yihiin culimada,taana waxaa marag u ah sawirkii quruxda badnaa ee ay soo bandhigeen muddadii gaabnayd ee ay talada u hayeen gobollo somaliya ka mid ah, inkasta oo dhalliilo jireen.Taas oo horseedaysa in iyagaas si kasta loo garab istaago.

Alle ayaanan ka baryayaa in uu inoo dambi dhaafo, sida xaqa ahna na waafajiyo.

Warsame Naalleeye

cirsankayeer@hotmail.com

TIXRAACA MAQAALKA

1)qaran jabkii somaliya---aw –jaamac cumar ciise

2)hadimadii gumaysiga---c/qaadir aromo

3)shirqool qaran---xasan cabdi(web.qarannimo)

4)yaa gablami,yuuse good dili?—Dr.c/llaahi Ispanish

(maqaal—faafin.web.somali talk)

5)qorshaha Itoobiya ee ku wajahan Somaliya

—warbixin ay soo saartay w/arrimaha dibadda(web.somali talk)

6)tuxfatul-awfiyaa—SH.Ibraahim maax(carabi)

7)Nidaalu-somal-al-qarbi—SH.yussuf Sayid(carabi)

8)Axjaar calaa ruqcati-shadranj---William gye karl.

Wixii talo iyo tusaale ah la soo xiriir qoraha maqaalka

Warsame Naalleeye E-mail address cirsankayeer@hotmail.com